# Adiga, aniga, waxaan nahay dugsiga dhaqanka

Dugsiga dhaqanku waxa uu bixiyaa koorasyo iyo nashaadaad kuwaasoo adiga oo ay da’daada u dhexaysa 6 ilaa 19 jir aad tijaabin karto heeso, qoob ka ciyaar, ku shaqaynta filimada, farshaxanka muuqaalka, dhoobo-samaynta, siirkus, masraxa ciyaarta ama qalabka muusiga iyo wax kaloo badan. Hadafkayagu waa in aad hesho wakhti firaaqo oo macno leh.

## Waxaan ka ambaqaadnaa carruurta iyo dhalinyarada

Dugsiga dhaqanka waxa cad ee uu ka duulo waa carruurta iyo dhalinyarada. Dhaqdhaqaaqayada fanka iyo waxbarashada, waxaan marka hore ka duulnaa heshiiska xuquuqda carruurta, qodobkiisa 31aad, kaasoo dhigaya in dhammaan carruurta iyo dhallinyaradu ay xaq u leeyihiin dhaqankooda.
"Dawladaha heshiiska saxiixay waa in ay ixtiraamaan oo ay kor u qaadaan xaqa ubadku u leeyahay in uu si buuxda uga qaybqaato dhaqanka iyo nolosha farshaxanka waana in ay dhiirigeliyaan bixinta fursadaha ku haboon oo siman ee hawlaha dhaqanka iyo farshaxanka iyo sidoo kale hawlaha dib-u-farsamaynta iyo madadaalada." Waxa kale oo aanu ka duulnaa yoolalka siyaasadeed ee ka jira degmada, taas oo macnaheedu yahay in carruurta iyo dhallinyarada fursad loo siiyo waayo-aragnimada dhaqanka iyo in loo oggolaado inay horumariyaan awooddooda hal-abuurnimo. Dugsiga dhaqanka waxa uu doonayaa in uu u suurtogeliyo carruurta iyo dhallinyaradu in ay arkaan, ogaadaan oona muujiyaan farshaxanka iyo dhaqanka!

**Dugsiga dhaqanka waa inuu:**

- siiyaa carruurta iyo dhallinyarada da'doodu tahay 6-19 jir farshaxan iyo waxqabad waxbarasho oo leh tacbiiraad dhaqameed iyo farshaxanno oo kala duwan
- bixiyaa waxqabad tayo sare leh oo suurtogal ah lehna ballaadhnaan iyo qoto dheer labadaba,
- bixiyaa adeeg muhiimadiisa leh, kasoo waxqabadku yahay mid la bed-bedeli karo dhinaca habka shaqada iyo qaabka.
- Inta badan qabtaa hawlahooda wakhtiyada firaaqada ee carruurta iyo dhalinyarada waxayna gacan ka geysanayaan waqtiyo firaaqo oo macno leh,
- suurtogeliyo in carruurta iyo dhallinyarada ay ka qayb qaataan ayna qaabeeyaan waxqabadka,

- noqdo goob kulan oo loogu talogalay horumarinta farshaxanka, shakhsiga iyo horumarinta bulshada oo ay ku kulmaan carruurta iyo dhalinyarada dhammaan qaybaha magaalada Göteborg
- bixiyaa waxqabad isku dhigma oo ay heli karaan dhammaan carruurta iyo dhalinyarada da'doodu u dhaxayso 6-19 kuna caawiya wakhtiyo firaaqo oo macno leh.

## Maadooyinkeenna iyo koorsooyinka

Dugsiga dhaqanka wuxuu leeyahay koorsooyin iyo waxqabadyo oo balladhan ayna kamid yihiin maaddooyinka dhaqanka iyo farshaxanka ee kala duwan. Kuwani waxay qabsoomaan wakhtiyada firaaqada ee carruurta iyo dhalinyarada, taas oo macnaheedu yahay maalinta dugsiga ka dib, galbihii,maalmaha sabtida, axadda iyo fasaxyada. Adiga oo ay da'daadu u dhaxayso 6 iyo 19 jir ayaa waxaa lagugu soo dhawaynayaa inaad codsato dhammaan koorsooyinka Dugsiga Dhaqanka ee loogu talogalay da'daada.

**Qaybaha maadooyinka**
Taswiirta iyo qaabaynta
Siirkus
Qoob ka ciyaaridda
Masrax-ka-ciyaarid, riwaayad iyo muusig
Sawiraad iyo Filin
Muusig
Horumarinta farshaxanka iyo hal-abuurka ee loogu talogaya adiga oo ay da'daadu u dhexeyso 13 iyo 19 sano

**Koorsooyin iyo waxqabadyo**
Dugsiga dhaqanka wuxuu bixiyaa koorsooyin gaagaaban iyo kuwo dhaadheer. Qaarkood waxay dhacaan dhowr jeer, halka kuwa kalena ay socdaan muddo sanad ah. Waxqabadyo badan waa bilaash, kuwa kalena waxay leeyihiin kharash yar.

Xaaladaha qaarkood, waa inaad aadaa dugsi ka duwan kan aad dhigato si aad u hesho casharkaaga sababtoo ah dugsiga dhaqanka uma wada furno fasallada dhammaan dugsiyada. Jadwalka waxaa badanaa la go'aamiyaa iyadoo lala tashanayo macalinkaaga bilowga simistarka.

Isku qor koorasyada aad xiisaynayso. Iyadoo aan loo eegeynin haddii aad tahay qof bilow ah ama leh aqoon hore, waxaad qayb ka noqon doontaa koox ka tarjumeysa heerkaaga intii suurtogal ah.

Waxa kale oo aanu haynaa hawlo xilliyada fasaxa iyo sidoo kale hawlo furan sanadka oo dhan halkaas oo aad tijaabin karto hawlo kala duwan oo aad fiirin karto waxa aad jeceshahay. Uma baahnid inaad kuwan iska diiwaan geliso, kaliya waa inaad iska timaadaa.

## Waxbaridda

Dugsiga dhaqanku wuxuu bixiyaa hawlo la waafajiyay shaqsiga iyadoo laga duulaya rabitaanka iyo baahiyaha ka

qaybgalayaasheenna.Xiisadaha waxay u baxaan si kooxo waaweyn iyo kuwo yaryar ah, waxayna ku baxaan af Iswiidhish.

Macalimiinta dugsiga dhaqanka waxay leeyihiin tababar adag oo ku saabsan maadooyinkooda. Qaar badan oo iyaga ka mid ah ayaa sidoo kale ah howlgalayaal farshaxanistayaal ah. Macalimiintayadu waa kuwo xirfad leh oo uu dhago nugul baahiyaha ka qaybgalayaasha oo diiradda saaraya.

## Loogu talogalay adiga leh baahiyaha gaarka ah ama naafo ah

Adiga naafada ah, waxaan kuu haynaa koorsooyin lagugu talogalay lana habeeyey. Waxaan waafajinaynaa oo aan ka duulaynaa shuruudahaaga iyo baahiyahaaga inta suurtogalka ah. Waxaad si buuxda uga qayb qaadan kartaa keligaa, sidoo kale waxa jira koorasyo ay ka qaybqaadan karaan mas'uuliyiinta ama hagayaasha. Haddii aad rabto, mas'uuliyiinta ama hagayaasha way kusoo dhowaan karaan inay kaala qaybqaataan ama kula fadhiistaan qolka xiisadda. Tan waxaa la sameeyaa iyadoo lala tashanayo macalinka.

Waxaad ka heli kartaa koorasyada lagugu talogalay laguna waafajiyay buugga koorsadayada. Koorasyada la heli karo waxay ka bixi karaan meelo kala duwan oo magaalada ah, mana aha oo kaliya gudaha deegaanka juqraafi  ahaan aad ku nooshahay. Haddii koorsada aad rabto in aad qaadato aan laga heli karin meesha aad ku nooshahay, waxaa lagugu soo dhaweynayaa inaad ka codsato meel kale.

Haddii aadan hubin koorsada kugu habboon, adiga iyo qoyskaaga waxaad la xiriiri kartaan mid ka mid ah hagayaasha dugsi-dhaqameedka kuwaasoo doonaya inay kaa caawiyaan inaad hesho koorsada kugu habboon. Wax badan ka sii akhri "Adiga naafada ah" ee barta goteborg.se/kulturskolan

## Xiriirka iyo baraha bulshada

Dugsiga dhaqanka wuxuu waxqabadyo ku leeyahay magaalada Göteborg oo loo qaybiyay afar goob juquraafiyeed: Badhtamaha magaalada, Hisingen, Waqooyi Bari iyo Koonfurta-galbeed ee magaalada. Way fududahay inaad la xiriirto dugsiga dhaqanka adiga oo wacaya ama u diraya iimayl qof jooga deegaanka aad ku nooshahay. Dhammaan macluumaadka xiriirka waxaad ka heli kartaa barta goteborg.se/kulturskolan

Nagala soco baraha bulshada, sida Facebook iyo Instagram.

**Facebook @kulturskolanigoteborg**
**Instagram @kulturskolangoteborg**

Kultur skolan